



Date: 20/03/2021

Hordhac:

Urur siyaasadeed ka shaqaalaha xoogsatada ah, waxaa uu ka midyahay 10 urur siyaasadeed ee gudiga doorashooyinka puntland gudoon siisay aqoonsiga rasmiga ah ee ururnimo dhawaana larajaynayo inuu sibuxda u noqdo Xisbi.

Waa urur siyaasadeed ay ku midoobeen dhammaan qaybaha kala duwan ee xoogsatada oo rumaysan in wadajirka lagu gaari karo wax ka badan inta lagu gaari karo keli-kelida.

Ururka shaqaalaha waxaa astaan u ah horumarinta shaqaalaha dhalinyarada waayeelka, waxbarashada, caafimadka, haweenka, dhalaanka, degaanka, tayenta ganacsatada, iyo adeeg bulsho oo hufan.

Mabaadii'da iyo ujeedooyinka Ururka

1. Ururka shaqaalaha xoogsatada Soomaaliyeed, waa ururka demoqaraadi ah, dan wadaag bulsho ah, oo rumaysan in wadajirka lagu gaari karo wax ka badan inta lagu gaari karo keli-kelida.
2. Wadajirku waa mid ay abuurto xubin kasta oo ka mid noqota ururka taas oo siineysa fursad xubintu awoodeeda maskaxeed iyo waaya aragnimo ku biirin karto dadaalka lagu dhisayo bulsho iyadu gacanta ku haysata kana talisa aayeheeda, midnimadadeeda dad iyo dal.
3. Ururka shaqaalaha Xoogsatadu wuxuu rumaysan yahay in xoogsigu sharaf yahay, kobcin awood dhaqaale yahay, horumar iyo dhisid qaran hodan ah yahay. Xoogsi la'aantuna tahay aasaaska saboolnimada, xurma darro iyo quursi bulshada

Garowe, Puntland, Somalia

Website: ururkashaqaalaha.so Email: info@ururkashaqaalaha.so

Phone +252905145690, +252907769535

dhexdeeda ah, u debec- sanaanta ku tiirsanaan qabiilka, u jajabnaanta ka mid noqoshada tuugada, xag jirka, isticmaalka maan -dooriyeyaasha, iyo ka fogaanta dhaqanka suuban iyo Diinta islaamka.

4. Ururka shaqaalaha xoogsatadu wuxuu ka qayb qaadanayaa hirgelinta tartanka demoqaraadiga ah ee loogu tartamayo xubnaha golayaasha sharci dejinta ee heer federal, heer maamul goboleed, heer gobol, iyo heer degmo.

5. Ujeedooyinka ururka si loo gaaro, wuxuu meel marinayaa barnaamijkan wax ku oolka ah:

- a) Qorshaynta iyo hirgelinta kobcinta dhaqaale qaran,
- b) Dhisid bulsho caddaalad ku dhisan oo leh dhammaan adeegyada caafimaadka, waxbarashada, biyaha, korontada, hoy jaban, xuquuqda hawl gabka, naafada, wararka iyo xogta,
- c) Ilaalinta deegaanka iyo horumarintiisa.
- d) Iskaashiga ururada Aqoonyahanada, xirfadlayaasha, iskaashatooyinka, iyo rugaha ganacsiga,
- e) Horumarinta iyo sugidda ammaanka muwaadinka, kan qoyska iyo kan qaranka.
- f) Federaalaynta, Baahinta Laamaha ururka biga iyo maamulka dawladnimo
- g) Wax ka bedelka hab nololeedka xoogsatada Beeraleyda, Kalluumaysatada, Xiji guratada iyo reer miyaga xoolo dhaqatada ah,
- h) Dib u habaynta iyo federaalaynta shuruucda dalka

Qorshaha waxqabad ee Urur siyaasadeed ka shaqaalaha

- Muhimaddena kowaad waa dib u dhiska shaqooyinka Dhalinyarda Raga iyo Dumar iyo siyaasadda iyo bulshada guud ahaan.
- Ururka shaqaalaha waxuu Dhowraa xuquuda muwaaddinka Punlanderka, sida diintiisa, noloshiisa, Sharaftiisa, maalkiisa, iyo caqligiisa si loo helo muwaadin guta waajibaadkiisa Ka saraan Puntland.

Garowe, Puntland, Somalia

Website: ururkashaqaalaha.so Email: info@ururkashaqaalaha.so

Phone +252905145690, +252907769535

- Ururka shaqaalaha wuxuu xoojiyaa lana dhiirigeliyaa baahinta nabadda, wadatashiga, hoggaansanka sharciga, Madaxbannaanida garsoorka, la dagaallanka musuqmaasuqa, iyo kutagrifalidda awoodaha dowladnimadda.
- Dhiirrigeliyo kobicnta dhaqaalaha iyo Shaqaale xaquuqdiisa iyo nolashiisa lana xaqiijiyo cadaalad ku qeybsiga shaqooyinka iyo Xafiisyada Puntland.
- Ururka shaqaalaha waxuu hormarinayaa waxbarashada, cilmi baarista, daryeelka caafimaadka, iyo ilaalinta hooyada iyo dhalaanka.
- Horumariyo Haweenka, Dhallaanka, lana daryeelo qoyska, agoonta iyo kuwii ku naafoobay danaha Puntland.
- Ururka shaqaalaha waxuu horumariyo xiriirka wadamada caalamka, ururrada caalamiga iyo Urur goboleedyada si loogu wada nolaado, nabad iyo iskaashi, hor-umarineed Puntland iyo Caalaamka.

Qaab dhismeedka ururka

Qaab dhismeedka Ururka wuxuu ka kooban yahay qaybaha soo socda:

1. Shirweynaha ururka.
2. Golaha Dhexe ee uruka.
3. Guddiga fulinta ururka.